



Taariikhda Dhaqangalka: Diseembar 3, 2020

Hagista Qaybta - Hawlgallada Isku-Adeega ah

Maamulka: Amarka Fullinta Lamb 20-66, ORS 433.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

Khusaynta: Hagistani waxay khusaysaa hawladeenada hawlaha isku-adeega ee ganacsiyada cuntada iyo cabidda, oo ay kujiraan laakiin aan ku xaddidnayn dukaanada wakhtiga dheeraadka shaqeeya iyo dukaamada raashiinka, maqaayadaha cuntada iyo baararka, goobaha samaynta khamrada, iibiyayaasha khamrada, qolalka dhadhaminta iyo shubayaasha khamrada ee gobolka oo dhan.

Hagistani ma khusayso sharraxidda iyo iibinta alaabta, cuntooyinka daadsan, cuntooyinka bashqadaysan ee yaalo dukaanka raashinka, dukaanada wakhtiga dheeraadka ah shaqeeya ama dukaanada kale ee tafaariiqda.

Hirgelinta: Ilaa xadka uu habraacan jiheyntu u baahan yahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waa wax la fulin karo sida lagu qeexay faqradda 10-aad ee Amarka Fulinta ee lambarkiisu yahay 20-66.

Qeexitaano: Ujeedooyinka hagistan dartood, qeexitaanada soo socda ayaa lagu dhaqmi:

- “Dhadhaminta Khamradu” waxay ka dhigan tahay wax aan ka badnayn 1/2 wiiqiyadood oo khamro la xareedeeyey ah, 1½ wiiqiyadood oo waayn/sidaar ah, ama 3 wiiqiyadood oo khamriga heedda ka samaysan ah.
- “Cuntooyinka Daadsan” waxa loola jeedaa cuntooyinka aan bashqadaysnayn ama duubnayn, la warshadeeyey ama aan la warshadayn ee ku jira weelka bagaashka kuwaasoo marba inta macmiilku doono laga soo guro, laakiin kuma jiraan miraha darayga ah, khudaarta darayga ah, lawska qolofa leh, saxanka saladka ama cuntooyinka halista yeelan kara.
- “Meesha taabashadu ku badan tahay” waxaa loola jeedaa hawl isu-adeeg ah halkaasi oo macmiilku uu taabto halmar wax ka badan sagxada si uu galaangal ugu yeesho cuntada ama sharaabka, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, suxuunta saladka, goobaha naaxi-naftaada, hawlaha quraacda yurubiyaanka, hawlaha cuntada suunka ku socota, **iy**o suxuunta caanaha-fadhiya ee la barafeeyey lana carfiyey.
- “Bashqadaysan” waxa loola jeedaa dhalo ku jira, qasaacadaysan, kartoon ku jira, si adag loo baceeyey, ama si adag loo duubay, ha noqoto mid lagu bashqadeeyey ganacsi cunto gada ama warshad cunto samaysa.

- “Cunto Halis Yeelan Karta” waxa loola jeedaa cunto kasta oo ka kooban gabi ahaan, ama qayb ahaan, caano ama waxsoosaarka caanaha, ukun, hilib, hilib shimbirreed, kalluun-qolof, carsaanyada la cuno ama waxyaalaha kale, maadooyinka macmalka ah, oo u sameysan qaab awoodaya taageeridda korriinka dhakhsada ah ee socda ee noolaha ili-ma-aragtayga ah ee caabuqa ama sunta leh, laakiin kuma jirto cuntada leh heerka awoodda haaydarojiin (pH) oo ah 4.6 ama ka hooseeya ama heerka dhaqdhaaqa biyaha oo ah 0.85 ama ka yar.
- “Waxsoosaar” waxaa loola jeedaa waxsoosaarka beeraha ee cayriinka ah sida miraha, khudaarta, beeriga ama lawska aan la warshadayn.
- “Muunad” waxay ka dhigan tahay qayb cunto ah ama sharaab bilaa khamri ah oo saddex wiiqiyadood ah ama ka yar.
- “Halwaha isu-adeega” waxa loola jeedaa wixii hawl ah halkaasi oo macmiilku awoodo inuu isagu soo qaato cuntada ama sharaabka iyadoo aanu caawin ka heleyn qof shaqaale ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn cuntada qofku isagu guranayo ama mashiinka sharaabka ama xarumaha, mashiinada caanaha ciirta ah ee la barafeeyey, bun qaybiyeyaasha iyo xarumaha dib u buuxinta jalxadaha.

Hawlwadeenada hawlaha isu-adeega waxa looga baahan yahay inay:

- Dib u eegaan oo hirgeliyaan [Hagista Dukaamada Tafaariiqda](#) sida khusaysa
- U hoggaansanaadaan [Hagista Ganacsiyada ee Cunidda iyo Cabitaanka](#) iyadoo lagu saleynayo heerka halista ee loo qoondeeyay degmada uu ganacsiga ku yaal, haddii la bixinayo cunid iyo cabitaan goobta ah, oo ay ku jiraan dhadhaminta iyo muunadaha
 - Xiraan ku isticmaalka cuntada iyo cabitaanka ee goobta ee gobolada halista aadka u sarayso ku jira, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, goleyaasha cuntada iyo aagaga dhadhaminta.
- Hubiyaan in dhammaan ilaha cuntada ama sharaabka ee la wadaago ee leh meelo taabashadu ku badan tahay oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, suxuunta saladka, goobaha naaxi-naftaada, hawlaha quraacda yurubiyaanka, hawlaha cuntada suunka ku socota, iyo suxuunta caanaha-ciirta ah ee la barafeeyey lana carfiyey, ay kaliya shaqaaluhu u geeyaan macaamiisha oo aan ahayn isu-adeeg.
- U hoggaansamaan xeerarka khuseeya ee nadaafadda cuntada ee deegaanka iyo gobolka: Caafimaadka Dadwaynaha Degmada ee Deegaanka - [Sharciyadda Nadaafadda Cuntada \(OAR 333-150\)](#) Waaxda Beeraha ee Oregon - [Xeerka Cuntada Tafaariiqda \(OAR 603-025-0030\)](#).
- Haddii la siinayo weelka fur-o-tuurka ah macaamiisha, waa in qof kasta weelkiisa loo duubo.
- Si joogto ah u nadiifiyaan oo u jeermis-dilaan waxyaalaha loo isticmaalo hawlaha isu-adeega oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, weelka adeegga, mishiinada sharaabka saydha iyo qasabadaha, mishiinada caanaha ciirta ah ee la barafeeyey, qaybiyeyaasha bunka, iyo xarumaha dib u buuxinta jalxadaha. U isticmaal jeermisdileyaasha, si waafaqsan tilmaamaha dhagaatiga, ee lagu daray liiska ay ansixisay [Hay'ada Illaalada Deegaanka \(EPA\)](#) ee loogu talagalay fayraska SARS-CoV-2 ee sababo COVID-19.

- Hirgaliyaan oo la socdaan shuruudaha kala fogaanshaha dadka ee dhammaan macaamiisha iyo shaqaalaha si ay u hubiyaan in macaamiisha iyo shaqaaluhu ayna ku ururin ama ku wada kulmin meel ka mid ah aagga isu-adeega.
- Isticmaalaan calaamado, xarig ama tilmaamayaal muuqda, si ay gacan uga gaystaan u hoggaansanaanta kala fogaanshaha dadka.
- Ka mamnuucaan macaamiisha dib u buuxinta ilaa macmiilku uu isticmaalayo weel cusub oo ganacsi ahaan la nadiifiyay.
- U diyaariyaan maacuun ama weelal cusub macaamiisha si ay ugu isticmaalaan isu-adeega dib u buuxinta.
- Iska tuuraan cunto kasta oo laga yaabo inay wasakheeyeen macaamiisha ama shaqaalaha, iyadoo ugu wacan tahay taabashada, ku hindhisida ama ku qufucida markay ku jiraan safka adeegga.
- Si joogto ah u nadiifiyaan oo u jeermis-dilaan sagxadaha la taabto ee aan cuntada loogu talagalin oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, meelaha taabashadu ku badan tahay ee marfishyada, sidooyinka albaabada iyo meelaha la qabsado jaranjarta.

Ilaa iyo intii suurtoagal ah, hawlwadeenada hawlaha isu-adeega ee dukaamada tafaariiqda waa inay laakin loogama baahna inay:

- Soo saaraan Habraacyo Hawlgal oo Jaango'an oo qoran si ay u taageeraan hawlaha isu-adeega, oo ay ku jiraan calaamadaha dhegan, tilmaamaha macmiilka, heerka joogtaynta nadaafadda iyo xilsaarida shaqaale.
- Bixiyaan gacmo-nadiifiye macmiilku isticmaalo bilawga iyo dhammaadka aagga isu-adeega.
- Siiyaan gacmo-gashiyada fur-o-tuurka ah, waraaqaha xashka ka sameysan ama weelasha halka mar la isticmaalo macaamiisha.

Dhigaalo dheeraad ah:

- [Calaamado aad goobta ku dhejin kartid](#)
- [Habraaca hagitaanka Gobolka oo dhan ee khuseeya Maaskarada, Waji Daboolada, Gaashaanka Wajiga](#)
- [Habraaca hagista Guud OHA ee khuseeya Loo-shaqeeyayaasha iyo Ururada](#)
- [Xaashida Xaqiiqda ee Xeerka Cuntada ee #1-Yaraynta Ku Taabashada Gacan Maran \(khuseeya xarumaha degmadu shatiga ka haysta oo kaliya\)](#)
- [Xaashida Xaqiiqda ee Laguma Taaban Karo Gacan Maran ee ODA \(khuseeya dhammaan xarumaha ODA shatiga ka haysta\)](#)

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us.